

Early Learning Dual Language Designation

Frequently Asked Questions

Q: Waa maxay macnaha erayga ama qeexida magacaabista "labada luuqadood"?

A: Qaybta 305 ee Xeerka Bilawga Carruurta ([Fair Start for Kids Act](#)) waxey ugu baaqday DCYF in ay fuliso qeexida ama in ay samaysato magacaabista labada luqadood. Naqshadaynta labada luqadood waxay tusinaysaa in barnaamijka waxbarashada hore loo aqoonsaday inuu bixiyo waxbarasho labada luqadood oo ku saabsan deegaankooda

daryeelka.

Bixiyeyaasha labada luuqadood waxay xaq u yeelan doonaan maalgelin lacageed. DCYF waxay iskaashi la sameynysaa kooxaha la-talinta dhinaca dhaqanka, dhinaca labada luqadood, iyo dhinaca juqraafi kala duwan, si loo horumariyo heerarka magacaabista ee la jaan qaadka si loo ballaarinayo Heerarka Tayada Sare, (Early Achievers), Heerarka Waxqabadka loo yaqaan (ECEAP), Nidaamyada Bilowga waxbarashada hore (headstart), iyo Hagidda Labada Luqadood. Barnaamijyada la qorsheeyay ayaa laga yaabaa inay u qalmaan maalgelin lacageed, si loogu ballaariyo adeegyada labada luqadood, ee horeyu siiyen carruurta iyo qoysaska.

Q: Maxaan ku isticmaali karaa lacagta?

A: Lacagaha waxaa loo isticmaali karaa in lagu kordhiyo mushaharka xubnaha shaqaalaha ee bixiya barashada labada luqadood, iyo sidoo kale horumarinta xirfadeed ee ku salaysan shaqada iyo wakhtiga qorsheynta, tababarka, manhajka, agabka waxbarashada, iyo kharashynta kale ee la xiriira.

Q: Yaa u qalmo inuu codsado lacagaha loogu talagalay magacaabista labada luqadood?

A: ECEAP iyo qandaraasleyaashii hore ee ECEAP, bixiyeyaasha xanaanada caruurta sharciga leh, iyo qaataha taageerada labada luqadood ee hela kaalmada gobolka ayaa dhamaantood xaq u leh inay codsadaan magacaabista laba luqadood. Magacaabista waa la kala sooci doonaa, taasoo u oggolaanaysa codsadaayaasha inay codsadaan barnaamijyada heerarka kala duwan ee horumarka.

Q: Goorma ayaan awoodi karaa in aan codsado magacaabista labada luqadood?

A: Marka la gaadho Juun 30, 2022, waxa la samayn doonaa habaynta labada luqadood. DYCF waxay dhowaan bixin doontaa faahfaahin ku saabsan nidaamka dalabka dhammaan abaalmarinta ku saabsan Sharciga Bilowga Carruurta ([Fair Start for Kids Act](#))



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Q: Wuxaan jeelaan lahaa inaan bilaabo ama ballaariyo barnaamijkayga labada luuqadood, Waa maxay noocyada kaalmada iyo tababarada la heli karo?

A: DCYF waxay ku biirtay dalada sanadaha hore ee WIDA. WIDA waa xarun cilmi-baaris ku salaysan, xog-ogaal u ah bare oo loogu talagalay xirfadlayaasha la shaqeeya carruurta iyo qoysaska luqadaha badan ku hadla. Xubinimada WIDA waxay siisaa fursado tababar oo bilaash ah, oo luqado badan ah, xirfadle kasta oo waxbarashada hore ah ee gobolka Washington, oo ay ku jiraan macalimiinta, bixiyayaasha guriga qoyska, iyo tababarayaasha. WIDA waxay sidoo kale bixin doontaa casharo eLearning-ka iyo sidoo kale maktabad kheyraad weyn oo agab daabacan ah, oo luqado kala duwan ku qoran.

Tababbarka Barashada Labada Luqadood ayaa sidoo kale heli kara xirfadlayaasha barashada hore iyada oo loo marayo DCYF. U dir email Athena.Jimenez-Manalo@dcyf.wa.gov, si aad ula xiriirto tababaraha!